

Daryeelayaasha Liiska Diyaarinta ee Dugsiga Xanaanada Ka Hor/Dugsiga Xanaanada - 1/3

Madaama ilmahaagu uu dhakhso ku socdo da'da dugsiga, waxaa laga yaabaa inaad ka fikirayso in isaga ama iyadu leeyahay xirfadaha lagama maarmaanka u ah inay ku guuleystaan qaybtan cusub oona adag ee caruurnimadooda. Si aad ilmahaagu uga caawiso ka gudubka, Barnaamijka Waxbarashada Soo-galootiga ee Pennsylvania (Pennsylvania Migrant Education Program) ayaa ku siiyay liiska dhaqamada kaas oo dugsiyada degaanada iyo barnaamijyada dugsiga xanaanada carruurta ee dhammaan gobolka ay si joogta ah u eegaan si ay u fahmaan in ilmuhu heli karo xirfadaha dugsiga ee lagama maarmaanka u ah dhigashada dugsiga. Inaad ilmahaagu guriga kula shaqayso ayaa waxay ka caawin doonta inay si dhib la'aan ah oon a raaxo leh ugu gudbaan dugsiga. Fadlan xusuusnow: cunug kasta oo buuxiya shuruuda da'da dugsiga xanaanada ee degaanka ayaa xaq u leh inuu dhigto dugsiga xanaanada. Khayraadkani waa in aan marnaba loo isticmaalin in cunug da'da ahaan u qalmay dugsiga xanaanada laga saaro dugsiga.

Haa	Weli	#	Horumarinta Arimaha Bulshada iyo Dareenka	Tusaalaha Haa noqon karo
		1	Ilmahaagu ma dhibtaa inuu ka tago hooyo iyo aabo?	Ilmuhu si sahlan oona farxad leh ayuu uga tagi karaa waalidiinta.
		2	Ilmahaagu ma yaqaanaa magaca qof kasta oo ku nool guriga?	Ilmuhu wuxuu garanayaa magacyada dhammaan xubnaha wuxuuna xubin kasta ka sheegayaa wax uu ka yaqaan.
		3	Ilmahaagu ma xalliyaa khilaafyada fudud isagoon la caawin?	Ilmuhu wuxuu xalliyaa khilaafyada isagoon la caawin, isagoo ka fikiraya baahiyada iyo rabitaanada dadka kale iyo kuwiisa.
		4	Ilmahaagu ma fahamsan yahay shuruucda iyo cawaaqibta?	Ilmuhu wuu garanayaa oo wuu raacaa shuruucda wuxuuna sharxi karaa sababaha loo leeyahay shuruucdan.

Haa	Weli	#	Horumarinta Luqadda iyo Qorista/Aqrinta	Tusaalaha Haa noqon karo
		1	Ilmahaagu miyuu garanayaa magaciisa oo dhamaystiran iyo da'diisa?	Ilmuhu wuxuu sheegayaa magaciisa oo dhamaystiran wuxuuna faraha ku tirinayaa da'diisa.
		2	Ilmahaagu ma kala saari karaa xarfaha iyo lambarada?	Ilmuhu wuu aqoonsanayaa wuxuuna magacaabayaa xarfaha iyo lambarada qaarkood.
		3	Ilmahaagu ma far-fiiqi/tilmaami karaa kaafada/bogga hore, kaafada/bogga dambe iyo cinwaanka buugga?	Ilmuhu wuxuu far-fiiqi/tilmaami karaa dhammaan saddexda shay.
		4	Ilmahaagu dib ma u sheegi karaa sheeko isagoo raacayo taxanka saxda ah ee sheekada?	Ilmuhu wuxuu sheegi karaa sheekooyin ku saabsan sawira ama dhacdooyin isagoo raacaya taxanka saxda ah.
		5	Ilmahaagu ma qori karaa magac isagoo adeegsanaya foomamka xarfaha u eg ama qoraallada caadiga ah?	Ilmuhu wuxuu ku qori karaa magaciisa koowaad, iyadoo inta badan xarfaha sax yihiin.
		6	Ilmahaagu miyuu raaci karaa marka la siiyo hagitaan/tilmaan labo tallaabo/qaybood ah?	Ilmuhu wuxuu raaci karaa tilmaamaha wuxuuna fahmayaa ujeedada tilmaanta.
		7	Ilmahaagu ma wadaagaa waayo-aragnimada marka la weydiyo?	Ilmuhu wuxuu ka hadlaa fikradaha, dareemada iyo ra'yiyada shakhsiyeed.
		8	Ilmahaagu ma ku hadlaa weedhooyin dhamaystiran?	Ilmuhu wuxuu ku hadli karaa Ingiriis leh weedhooyin dhamaystiran.

Daryeelayaasha Liiska Diyaarinta ee Dugsiga Xanaanada Ka Hor/Dugsiga Xanaanada - 2/3

Haa	Weli	#	Fikirka iyo tacbiirta xisaabeed	Tusaalaha Haa noqon karo
		1	Ilmahaagu ma tirin karaa 1 ilaa ugu yaraan 20?	Ilmuhu wuxuu tiriyaa 1 ilaa 20.
		2	Ilmahaagu ma aqoonsan karaa ugu yaraan 4 qaabab (Tusaale:, Afar geesle, goobo, saddex geesle, leydi)	Ilmuhu wuxuu far-fiiqaa oona magacaabaa 4 qaabab.
		3	Ilmahaagu ma sharxi karaa booska waxyaabaha/shay-yaasha maalinlaha ah?	Ilmuhu wuxuu isticmaalaa erayada booska (kor, gadaal, hoos, xige, horay, iwm.) ama ereyada taxanka (koowaad, dambe, iwm.) si uu u sharaxo booska shay.
		4	Ilmahaagu ma kala sooci karaa, isbarbar dhigi karaa, kooxayn karaa ugu yaraan 5 shay isagoo adeegsanaya sifooyinka sida cabirka, tirada, qaabka ama midabka?	Ilmuhu wuxuu kala socaa shay-yaasha isagoo adeegsanaya hal sifo. Ilmuhu wuxuu kala soocay alaabta caruurta ku ciyaaraan ee xayawaannada iyo baabuurta.

Haa	Weli	#	Hababka Waxbarashada iyadoo loo marayo Ciyaar	Tusaalaha Haa noqon karo
		1	Ilmahaagu miyuu jecel yahay mowduucyo, fikrado iyo hawlo cusub?	Ilmuhu wuxuu weydiiyaa su'aalo si uu u fahmo wax cusub. Ilmuhu wuxuu rabaa inuu barto waayo-aragnimo cusub.
		2	Ilmahaagu ma dhagaystaa oo fahmaa sheeko ama hawl qaadanyisa in ka badan 15 daqiiqo?	Ilmuhu wuxuu ku dhagnaan/xirnaan karaa hawsha xitaa marka hawshu noqoto mid adag.
		3	Ilmahaagu ma isticmaalaa fikradiisa/fikradeeda iyo hal-abuurkiisa/hal-abuurkeeda si uu ugu ciyaaro shay-yaasha?	Ilmuhu wuxuu ciyaari karaa isagoo isticmaalaya shayaal kala duwan kuwaas oo uu ficil iyo dhaqdhaqaaq siin karo.
		4	Ilmahaagu ma xallin karaa dhibaata isagoo madax bannaan?	Ilmuhu wuxuu isku dayaa inuu dhibaatooyin ku xalliyo in ka badan hal qaab.

Haa	Weli	#	Caafimaadka, Fayoqabka, iyo Horumarka Jirka	Tusaalaha Haa noqon karo
		1	Ilmahaagu ma aqoonsan karaa oo ma tusi karaa qaybaha jirka?	Ilmuhu wuxuu far-fiiqi/tilmaami karaa oona magacaabi karaa qaybo badan oo jirka ah isagoo aan wax caawimaad ah helin.
		2	Ilmahaagu miyuu sameeyn karaa waxyaabaha asaasiga ah isagoo madax bannaan?	Ilmuhu wuxuu garanayaa isticmaalka musqusha Ilmuhu wuxuu dhaqan karaa gacmaha, Ilmuhu wuxuu xirtaa dharka, Ilmuhu wuu cadaydaa, Ilmuhu wuxuu leeyahay wakhti jiif oo joogta ah.
		3	Ilmahaagu si madax banaan wax ma u cuni karaa oo ma cabbi karaa isagoo isticmaalayo maacuunta habboon?	Ilmuhu wuxuu si habboon u isticmaalaa fargeetada, qaadada, mindida, istiraashada, saxanka, baaquliga iyo koobka.
		4	Miyuu ilmahaagu muujiyaa/muujin karaa isku-dubbaridka dhaqdhaqaaqa jirka marka dhammaan muruqyada jirka ay firfircoon yihiin?	Ilmuhu wuxuu awoodi karaa inuu jaranjarada kor iyo hoos ugu socdo. Ilmuhu wuxuu awoodaa inuu ordo oo uu laado kubbad.

Daryeelayaasha Liiska Diyaarinta ee Dugsiga Xanaanada Ka Hor/Dugsiga Xanaanada - 3/3

Haa	Weli	#	Caafimaadka, Fayoqabka, iyo Horumarka Jirka	Tusaalaha Haa noqon karo
		5	Ilmahaagu ma iskabixin karaa mana xiran karaa dharka kore (jaakada, kabaha, koofiyada, gacmo-gashiga) isaga oo aan la caawin? (oo ay ku jiraan xirashada sinyeeriga, xirashada guluusya, iyo xirida).	Ilmuhu wuxuu xiran karaa iskana bixin karaa; sigisyada, kabaha, surwaal hoosaadka, fanaanada, jaakada, gacmo-gashiga iyo koofiyada.
		6	Miyuu ilmahaagu isticmaalaa/isticmaali karaa maqas isagoo kantoroolayo ujeedana ka leh?	Ilmuhu wuxuu maqaska ku gooyaa xariijimo toosan iyo kuwa qalloocan.
		7	Miyuu ilmahaagu qoraa/qori karaa ama sawiri karaa isagoo leh gacan qabsi wax ku ool ah.	Ilmuhu wuxuu isticmaalaa shan, afar ama saddex farood si uu u qabsado qalabkooda qoraalka.

Ilmahaygu wuxuu leeyahay _____ lambar/tiro oo Haa ah.